

Waqtiyada rugta buuggaga ay furan tahay

Waqtiyada rugta buuggaga ay furan tahay wax ayaa laga beddelayaa xilliga kulaylaha iyo maalmaha ciidaha. Eeg shabakadaya Internet-ka.

bibliotek.uddevalla.se

<p>Stadsbiblioteket Södergatan 26, tal 69 65 00</p> <p>stadsbiblioteket@uddevalla.se</p>	<p>Dalabergs bibliotek Dalabergs centrum tal 69 65 43</p> <p>dalabergsbibliotek@uddevalla.se</p>
<p>Ljungkile bibliotek Hälle Lider 2C tel 69 53 47</p> <p>ljungkilebibliotek@uddevalla.se</p>	<p>Baas buug saaran yahay (Bokbussen) ayaa wuxuu ku socdaa jadwal laga heli karo rugta buuggaga ama shabakada Internet-ka. bibliotek.uddevalla.se tel 69 65 09</p>



Ku soo-dhowaada

Uddevalla stadsbibliotek

Xeerarka amaahda



Xeerarka amaahda

Kaarka amaahda

Si aad buug u amaahato, waa in aad haysataa kaarka amaahda. Kaarku waa lacag la'aan, waxaana lagu isticmaali karaa dhammaan maktabadaha degmada Uddevalla.

- Si lagu siiyo kaarka amaahda, waa in aad wadataa kaarka aqoonsiga oo sawir ku dhegsan yahay, isla markaasna aad saxiixdaa heshiis.
- Waxaa kaarka amaahda la siin karaa carruurta kolka laga soo bilaabo maalinta ay 6 sano buuxsadaan ilaa ay 17 sano ka gaarayaan. Waxaana shardi ah in xannaaneeyaha ilmuhu saxiixo heshiiska.
- Kaarka amaahdu waxa weeye warqad shakhsi qur ah loogu talagalay. Qofka heshiiska saxiixay ayaana mas'uul ka ah wax alla iyo wixii kaarkaas lagu amaahdo.
- Haddii kaarka amaahdu lumo, waa in lagu wargeliyaa rugta buuggaga si loo joojiyo isticmaalkiisa.
- Waxaa kaarka lumay lagu beddelayaa kaar cusub kadib markii warqad aqoonsi la la yihim, lana bixiyey lacag khismad ah.
- Kaarka amaahda isticmaalkiisa waa la joojinayaa haddii si xun loo isticmaalo ama lagu yeesho dayn ka badan 100 karoon.
- Dhammaan isbeddelada adareeska iyo magacyada waxaa lagu wargelinayaa rugta buuggaga .

Lambarka sirta ah *Pinkod*

Waxaa lagu siinayaa lambar sir ah (PIN-kod) oo aad la isticmaasho kaarka amaahda. Waxaad lambarka sirta ah ku isticmaalaysaa kataloogga Internet-ka ee rugta buuggaga

- Si aad u eegto buugta aad amaahatay, oo aad dib ugu amaahato iyo si meel laguugu sii dhigo buug aad dooneyso.
- Haddii aad beddeleyso e-mailkaaga iwm. Lambarka sirta ah waa kuu gaar oo cidna ma amaahin kartid.

Amaah – dib-u-amaahasho – kaydin

- Amaahda 2 ama 4 toddobaad ah mar labaad ayaa la amaahan karaa. Waana la sii carbuunan karaa..
- Amaahda 7 maalmood ah mar labaad lama amaahan karo lamana carbuunan karo.
- Filimada 7 maalmood la amaahdo dib looma amaahan karo. Lacag ayaa laga bixinayaa afar iyo labaatankii walba oo dheeraad ah. Lamana carbuunan karo.
- Alaabta horay loo sii carbuntay dib looma sii amaahan karo.

Magdhaw

- Qofka wax amaahda waxaa waajib ku ah inuu magdhaw ka bixiyo wax alla wixii dhuma ama waxyeelo soo gaarto.
- Magdhawga la bixinayaa waa qiyaas lacag ah oo horay loo sii gooyey. Alaabta qaaliga ahna waxaa laga bixiyaa qiimo rugta buuggaga go'aamisay. Haddii amaahduhdu alaabta dib ka soo celiyo, wax lacag ah looma celin doono.

Amaahda iyo warbixinaha qofka

- Dhammaan alaabta la amaahday ama la carbuuntay waxay ku jiraan nidaamka kambiyuutarka rugta buuggaga .
- Warbixinaha halkaa ku qoranna waa qarsoodi. Markii alaabta la soo celiyana halkaa waa laga tirtiraa.

Degmada Uddevalla ayaa mas'uul ka ah warbixinaha lagu ururinayo diiwaanka amaahda. Ujeeddada diiwaanku waxa weeye in la fududeeyo maamulka amaahda maktabadda iyo in haddii loo baahdo laga eegi karo adareeska iyo kharashyada. Xeerka warbixinaha dadka ayaa go'aamiya cidda xaqa u leh in ay helaan warbixinahaas iyo xaqa in dib loo saxo.

Xeerarka isticmaalka kambiyuutarada iyo Internet-ka

- Isticmaalka kambiyuutarada rugta buuggaga waa bilaash.
- Si waqti looga qabsado kambiyuutarada rugta buuggaga waxaa loo baahan yahay kaarka amaahda iyo furaha lagu galo ee *PIN-kod*.
- Kaarka amaahda iyo lambarka sirtu waxay gaar u yihiin qofka iska leh oo cid kale lama siin karo.
- Si qaldan looma isticmaali karo, waxyeelana looma geysan karo qalabka kambiyuurada, qalabka iyo barogaraamyada ku jira midkoodna.

Rugta buuggaga waxay leedahay xeerarka isticmaalka kambiyuutarada oo waafaqsan xeerarka Qaramada Midoobay oo ku saabsan xuquuqda aadamiga:

- Waa mamnuuc in halkaa laga raadiyo ama laga diro sawirada ama filimada galmada, hadalo midabtakoor ah ama wax kale oo qof shakhsiyadii ku xaqgudbi kara.

Qofka aan raacin oo u hoggaansamin xeerarka rugta buuggaga waxaa laga xirayaa oo laga joojinayaa isticmaalka kambiyuutarada.